

Ku waalidka ardayda iskoolka billaabaysa iyo kuwa fasallada 1.- 3. ee iskoolka Lakkegata ee sanad dugsiyeedka 2021/2022

BOOS BAR AH OO BILAASH AH OO ISKOOKKA FIRFIRCOONIDA LAGA SIINAYO FASALLADA 1.-4. SANAD DUGSIYEEDKA 2022/2023

Dhammaan carruurta billaabaysa fasalka 1.-4. ee iskoolka x, waxaa boos bar ah oo bilaash ah laga siinayaa iskoolka firfircoonida (AKS) sanad dugsiyeedka 2022/2023. Waxaa booska la siinayaa laga billaabo bisha ogoosto 2022.

Xeerarka booska barka ah ee AKS

- 12 saac ayaa si siman maalmaha loogu qaybiyaa iskoolka kaddib, taas oo keenaysa in si wanaagsan wax loo qorsheeyo oo sare loo qaado tayada deeqda
- 2 maalin toddobaadkii inta lagu jiro fasaxyada iskoolka (fasaxa dayrta iyo jiilaalka, fasaxa ciidda masiixiga iyo midka booskaha iyo mid kasta oo ka mid ah toddobaadyada fasaxa xagaaga marka laga reebo bisha luuliyo oo uu AKS xiran yahay)
- Maalmaha qorshaynta ee iskoolka/maalmaha u dhexeeya maalmaha fasaxa ah ee sanad dugsiyeedka waxaa la yimaadaa maalin ½ ah (AKS wuxuu maalmaha qorshaynta iskoolka xirnaan karaa ilaa iyo laba maalmood sanadkiiba)

Haddii aad doonaysaan in uu ilmuhu ka qaybqaato deeqda ilmaha waxbarashada laga caawinayo oo dhan, waxaad codsan kartaan boos buuxa oo qiimahiisa la dhimay.

Boos buuxa oo qiimahiisa la dhimay

Qiimaha booska buuxa wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka ilmaha, qiimahiisuna wuxuu noqon doonaa ilaa iyo 1069 karoon bishiiba. Ilmaha boos buuxa ka haysta AKS wuxuu halkaas joogi karaa iskoolka ka hor iyo kaddib labadaba, wuxuuna joogi karaa maalmaha oo dhan marka uu iskoolku xiran yahay (marka laga reebo bisha luuliyo).

Ka qaybqaadashada oo sare loo qaado iyo aqoonta luuqadda oo la xoojiyo

AKS waa goob waxbarasho oo kale taas oo ciyaar iyo waxbarasho lagu xoojin doono horumarka carruurta ee dhinac maaddo iyo mid bulsho. AKS wuxuu bixinayaa deeq dhammaystiran ayada oo iskoolka lala shaqaynayo.

[Manhajka](#) iyo [xeer-hoosaadka ka yaalla AKS](#), iyo weliba [hagaha Wadashaqaynta guriga-iskoolka](#) ayay deeqdu ku salaysan tahay.

Hadafka laga leeyahay booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS waa in:

- Sare loo qaado ka qaybqaadashada AKS
- La xoojiyo aqoonta luuqadda ee ardayga
- Sare loo qaado tayada AKS lana hubiyo in ay ardaydo helaan deeq isku tayo ah

Sida soo socota ayaad boos uga codsan kartaa AKS

Waalidka ilmaha ee doonaya in ay ilmo ku daraan AKS waxay isticmaalayaan bogga internetka ee degmada Oslo www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen

Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan iskoollada bixiya boos AKS oo bar ah oo bilaash ah ka eeg <https://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/gratis-deltidsplass/>

Iskoolka la xiriir haddii aad wax su'aal ah qabto.

Mahadsanidiin

Dugsiyada Oslo